

Sida qaab dijitaal ahaan loola xiriiro degmada

Ma aha inaad noo soo wacdo sifo aad noola soo xariirto. Adiga ama qofka ehelkaaga ugu dhow waxaad isticmaali kartaan **eDialog**, taas oo ah hab ammaan ah oo lagu soo diro dukumentiyada iyo farriimaha, xitaa haddii ay ku jiraan xog xasaasi ah ama aan loo oggolayn in loo bandhigo dadweynaha.

Sida loo isticmaalo eDialog:

1. Guji xiriiriyaha hoose ama booqo www.oslo.kommune.no/kontakt/
2. Gal akoonkaaga adigoo adeegsanaya ID-porten (tusaale: MinID ama BankID)
3. Buuxi foomka oo ku lifaaq dukumentiyada aad rabto inaad dirto

Gal akoonkaaga eDialog ee Degmada Søndre Nordstrand

Nagala soo xiriir www.helsenorge.no

Marka lagu ogolaado adeeg degmeed, waxaad geli kartaa helsenorge.no iyo/ama abka Helsenorge si aad u aragto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegga lagu oggolaaday. Haddii adeeggu oggolaado isgaarsiin dijitaal ah, waxaad sidoo kale u diri kartaa farriimo adeegga.

Haddii aad rabto in qof ka tirsan qoyskaaga ku caawiyo, waxaad u ansixin kartaa inuu helo oo diro farriimaha adiga kugu magaca ah.

Adiga ama qofka aad u ansixisay waxaad qori kartaa oo ka jawaabi kartaa farriimaha mar kasta. Degmadu caadiyan waxay ka jawaabtaa ugu dambayn maalinta shaqo ee xigta.

Bogga helsenorge.no waxaad sidoo kale ka dhex samayn kartaa:

- Inaad aragto adeegyada degmada ee aad helayso
- In lagu soo ogeysiyo booqashooyinka guriga ee la qorsheeyey ama la dhammeeyey, adigoo SMS ama e-mail ku helaya.
- Inaad beddesho, joojiso ama aad ogeysiiso isbeddel ku saabsan booqashooyinka guriga.
- Inaad akhrido farriimihii hore.

Dhamaan farriimaha waxaa loo diraa hab ammaan ah waxaana lagu kaydiyaa nidaamka diiwaan-gelinta ee magaalada.

Si aad u gasho helsenorge.no, waxaad isticmaali kartaa BankID, Buypass ID ama Commfides e-ID si aad u xaqiijiso aqoonsigaaga.